Salaamo Qoyska Dugsiga Degmada Gobalka (DCSD),

Waxaan rajeynayaa in qof walba uu yeeshay dhammaad isbuuc badqab oo raaxo leh. Inaga oo isii dhawaaneyno dhammaadka simistarka, waxaan rajeynayaa in dhammaan aqoonyahanadeena ay yoolalkooda waxbarashada. Waa xili fasax, oo waan ogahay in qof walba ku faraxsanyahay oo rajeynayo nasiinyada qaboobaha, laakin aan ku hayno indhaheena qiimaha oo aan si xoogan u dhameyno simistarkaan! Nasiib wanaagsan oo ku saabsan imtixaamadaada Dhammaadka Koorsada Guulaha Georgia oo dhammaan aqoonyahanadeena dugsiga sare!

**Aqoonsiga guusha Ardayga**

Isbuucaan, waxaan idinla wadaagaya ardayga shannaad ee Ashford Park ee Ayush Roy. Maamulahiisa wuxuu yiri inuu yahay aqoonyahan, firfircoon, oo ku dadaalo inuu la sameeyo dadaalkiisa shaqo walboo la siiyo isaga. Waa arday ku dayasho mudan oo ku wanaagsan wax walba oo uu qabto. Wuxuu ku leeyahay dhammaan A's, barnaamijka hibada, oo wuxuu ku lugleeyahay howlaha waxbarashada dhaafsan. Waan ku faanaa inaan idinla wadaago ardaygaan cajiibka ah!

Waxaan sidoo kale rabaa inaan aqoonsado arday hore ee DCSD, Celina Smith. Ardaygaan hore ee 12-sanno jirka Wynbrooke ardayga Dugsiga Hoose ayaa hadeer u bilaabay sida Annie ee dhacdada muusikada tooska la baahiyay, "Annie Live!". Celina wuxuu ahaa aqoonyahan DCSD illaa iyo sannad dugsiyeedka 2018 - 2019 markii ay aaday inay sameyso oo la safarto dalxiiska qaranka ee "The Lion King," meeshaas oo ay ku ciyaartay Young Nala. Waxay aheyd farxad in la arko mid ka mid ah aqoonyahanadeena hore ee ku soo bandhigayo iftiin heerka qaranka. Aad ayaan ugu faanaa Celina oo waxaan u rajeyneynaa guulo badan mustaqbalka!

**Kooxda Tallaadada**

Wixii #TeamTuesday ee isbuuca la soo dhaafay, waxaan siiyay ogeysiis gaar ah labo xubnood koox weyn. Latonya Winters-Buford ayaa keeno sannooyin waaya aragnimo ah oo lagu kobcinayo bulshada ee Waaxda Xoojinta Qoyska iyo Bulshada! Waxay hogaamisaa Hogaaminta Waalidka oo kooxda Tababarka U doodista oo waxay u adeegtaa deegaankeena "anchorwoman." Waan uga mahadcelinaynaa hoggaaminteeda.

Jaceylka Angelica Rosso ee ay u qabto taageerida qoysaska, gaar ahaan qoysaska Laatiinaha, lama cabiri karo. Jaceylkeeda ugu weyn waa waxbarida waaladiinta inay noqdaan hogaamada iyo dadka ay ku daydaan carruurtooda. Waad ku mahadsantahay dhisida xiriirada wanaagsan ee u dhaxeeyo guriga iyo dugsiga!

**Kubada Cagta Cedar Grove**

Hambalyooyin ku aadan kooxda kubada cagta Dugsiga Sare Cedar Grove oo hormarinta geemka horyaalka gobolka AAA! Cedar Grove Saints ayaa ka badiyay Appling County 27-6 Jimcihii la soo dhaafay oo xoogsaday tikidkooda ku aadan geemka horyaalka gobolka. Saints wuxuu wajahayaa Carver-Atlanta ee Sabtiga, Dis. 11, galabkii ee Garoonka Center Parc ee ku yaalo Atlanta. Aad ayaan ugu faanaa aqoonyahanadeena ciyaaraha, shaqaalaha tababarida, iyo waaladiinta Cedar Grove. Waxay ku

dadaaleen inay gaaraan yoolalkooda, oo ma sugi karo inaan la dabaaldago guusha Sabtida. Socda, Saints!

**Bulshada Itoobiyaanka Huddle**

Waxaan rabaa inaan u mahadceliyo qof walba oo ka qeybgalay Bulshada Itoobiyaanka I.M.P.A.C.T. Huddle shalay. Waan ka mahadcelinayaa fursada loogu xirmayo Ururka Bulshada Itoobiyaanka Atlanta (ECAA) iyo kooxdeena sadexaad ee ugu balaaran qoysaska (Itoobiyaanka/Erateriyaanka) ee u heelan inay ku xirmaan dugsiga degmada iyaga oo taageerayo guusha ardaydooda. Waxay aheyd waaya aragnimo wanaagsan ee loogu xirmayo hogaamada ECAA oo si buuxdo uga qeyb ahaa oo kor u qaaday balanqaadkooda nalugula shaqeynayo si loo xoojiyo ardaydooda iyo qoysaska. Waxaan rajeynayaa xoojinta iskaashigeena aan la leenahay bulshada Itoobiyaanka.

**Hormarinta Kaleendarka 2022-2024**

Guddiga Kaleendarka waxaa lagu dalacaa soo bandhigida dooqyada kaleendarka ee daneeyayaasha bulshada ee DCSD. Daneeyayaasha waxay ku bixinayaan jawaab celin iyaga oo qaadanayo sahan/foomka su'aalaha oo lagu soo dhigayo websaydka degmada oo lagu qeybinayo dhinaca app-ka DeKalb, warbaahinta bulshada, shabakadaha i-meelka, websaydyada dugsiga deegaanka, iyo dadaalada kale ee xiriirka diyaarsan. Bogga sahanka wuxuu xirmayaa maanta, Dis. 6. Kaleendarada dugsiga 2022-2024 waxaa la soo bandhigayaa inta lagu jiro kulanka Guddiga Waxbarashada ee Dis. 13 oo tixgelinta iyo falka. Si loo dhameystiro sahanka, riix halkaan.

**Dugsiga Hoose Smoke Rise**

DCSD iyo Dugsiga Hoose Smoke Rise waxay ku faraxsanyihiin ku soo dhaweynta Kormeeraha guud ee Gobolka Richard Woods ee Smoke Rise Jimcihii la soo dhaafay. Smoke Rise wuxuu dhawaan aqoonsaday sida Xeerka Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare ee Qaranka (ESEA) Dugsiga ugu Buundo wanaagsan ee Waaxda Waxbarashada Georgia. Smoke Rise ayaa ka mid ah labo dugsiyo oo loo xushay aqoonsiga qaranka sida ay sababtay barnaamijyada waxbarashada guuleystay iyo hormarka waxbarashada ardayga.

Waan ku faanaa aqoonyahanada, macalimiinta, maamulayaasha, iyo bulshada dugsiga ee Smoke Rise sababtoo ah dhammaanteen waan ognahay in dugsiyada u soconayaan hioray iyo sare oo heerka sare iyo gaarista hamiladeena ee Ardayda DCSD, waxay qaadataa tuulo dhan. Waxaan rabaa inaan u mahadceliyo Kormeeraha guud Woods iyo Waaxda Waxbarashada Georgia markale oo aqoonsashada mid ka mid ah dugsiyadeena cajiibka ah.

**Kulanka Qorshaha Mastarka Dhameystiran**

Fadlan u diyaar ahaw Arbacada, Dis. 8, si aad u eegtid Qorshaah Mastarka Dhameystiran ee xigo (CMP) lagu kulmayo halka shaqaalaha DCSD ku soo bandhigayaan qabyo qoraalka lagu talliyay ee liiska mashruuca E-SPLOST VI. Waxay sidoo kale wadaneysaa wadahadalada hormarinada xarunta, balaarainta

waxbarashada, iyo tallooyinka ku haynayo DCSD inay horay iyo sare u socoto. Kulanka wuxuu bilaabanayaa saacada 6 p.m. oo waxaa dib looga eegi karaa halkaan.

**Sahanka Miisaaniyada**

Sannad walba, DCSD waxay sameysaa sahan onleen ah iyaga oo ka raadinayo tallo bulshada oo adeegyada iyo hormarinada howlgalka ah in la hirgeliyo. Miisaaniyada sahankaan waxaa loo naqshadeeyay inay aruuriso jawaabta bulshada ee sannadka maaliyada ee hormarinta miisaaniyada 2023. Dokumintiga miisaaniyada dhameystiran waxaa lagu xirayaa qorshaha xeelada degmada, hamilada, iyo yoolalka. Sannadka maaliyada miisaaniyada 2023 ayaa sidoo kale muujineyso adeegyada looga baahanyahay ardayda, shaqaalaha, iyo muwaadiniinta Gobolka DeKalb. Bogga sahanka wuxuu xirmayaa ee Dis. 13. Si loo dhameystiro sahanka, fadlan riix halkaan.

**Baaritaanka Kormeerida**

Iyada oo la kaashanayo Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Georgia, Waaxda Caafimaadka Ardayga way ku faraxsanyihiin inay u keenaan baaritaanka illaalada DCSD. Baaritaanka kormeerida waa qaab badqab, wax ku ool leh oo lagu xadeynayo faafida COVID -19 iyo sii wadida ku haynta dugsiyada kuwa u furan waxbarashada qof ahaanta. Baaritaanka COVID-19 ma ahan qasab laakin waxaa loo bixiyay inay illaaliso ardayda, shaqaalaha, xubnaha qoyska, iyo bulshadeena. Barnaamijka baaritaanka bilaashka ah waxaa loo heli karaa dhammaan ardayda, xittaa haddii ay si buuxdo u tallaalanyihiin. Wixii warbixin dheeraad ah, fadlan riix halkaan.

Baaritaanka COVID-19 ayaa sidoo kale looga helayaa waaladiinta iyo shaqaalaha Dugsiha hoose Doraville United ee rugta caafimaadka dugsiga. Caafimaadka MedCura, oo kaashanayo Waaxda Caafimaadka carruurta ee Dugsiga Jaamacada Emory ee Daawada, waxay bixinayaan baaritaan bilaash ah Isniinta iyo Arbacada ka bilow 8 a.m. illaa 2 p.m. Waan u mahadcelineynaa jaalalka bulshadeena Caafimaadka MedCura iyo Waaxda Caafimaadka carruurta ee loogu adeegayo shaqaalaheena iyo waaladiinta. Wixii warbixin dheeraad ah, fadlan riix halkaan.

**Aqoonsiga Sahanka Bulshada**

DCSD ayaa hadeer marayo nidaamka cusbooneysiinta aqoonsiga. Qeyb ka mid ah nidaamkaan waa aruurinta jawaab celinta ka imaaneyso daneeyayaasha. Waxaan kugu casuumeynaa inaad ka qeybqaadatid Sahanka Daneeyayaasha Qoyska iyo Bulshada. Natiijooyinka sahankaan, oo ay la jiraan waxyaabaha kale ee daneeyayaasha, ayaa lagu isticmaalayaa nidaamka cusbooneysiinta aqoonsiga.

Sahanka Daneeyayaasha Bulshada iyo Qoyska ayaa lagu heli karaa luuqadaha xiggo: Amxaaro, Carabi, Bengaali, Burmeesa, Shiineeska, Ingiriiska, Faransiiska, Hindida, Nebaali, Soomaali, Isbaanish, Sawaaxiili, Telugu, Tigriinya, iyo Fiitnaamees. Sahanka waa qarsoodi oo wuxuu qaadanayaa qiyaastii 10 daqiiqo lagu dhameystirayo. Waxaad ka geli kartaa sahanka ciwaanka xiggo:
https://survey.sogosurvey.com/r/eY7O00.

Fadlan sii wad inaad ka booqatid websaydkeena iyo websaydka dugsigaaga oo warbixin ugu dambeyso ee wararka degmada. Isbuuc wanaagsan!

Daacadnimo,

Marwo Cheryl Watson-Harris